



## (Qofka akhriya xaraf ka mid ah kitaabka Ilaahay wuxuu ka halayaa hal xasano, halka xasano waxay u dhigantaa toban laabkeed

Cabdullaahi Binu Mascuud Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: (Qofka akhriya xaraf ka mid ah kitaabka Ilaahay wuxuu ka halayaa hal xasano, halka xasano waxay u dhigantaa toban laabkeed, ma oranaayo {ألم} waa xaraf, laakiin Alifku waa xaraf, oo laamku waa xaraf, oo miimku waa xaraf).

[Xadiis Xasan ah] [Waxaa wariyay At-tirmidi]

Rasuulku scw wuxuu sheegay qof kastoo muslim ah oo akhriya xaraf kitaabka Ilaahay ka mid ah, inuu ka helaayo hal xasano, kaasoo ajarka loo laalaabay toban laabkeed. Rasuulku scw wuxuu ku cadeeyey hadalkiisaa isagoo dhahay: (ma dhahayo alif laam miim) waa xaraf, laakiin alifku waa xaraf, laamku waa xaraf, miimkuna waa xaraf): waxay ahaanaysaa saddex xaraf oo soddon xasano laga helayo.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/6275>

